Falalka xoog-muquuniska ku salaysan ee qoysaska ka dhaca
Halkan waxaad ka heli karta lambarrada taleefanada ugu muhimsan, iyo xiriiriyeyaalka ururrada dumarka ee loogu talagalay dumarka loo geystay ama ku sugan xaalad xooq-muquunis ku salaysan. Kuwaaso u baahan taageero iyo caawinaad.

Yaan la xiriira?

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah wac SOS 112

Heeganka dumarka - Kvinnojouren Kaita, Hallstahammar/Surahammar
Tal. 0220-29015

Ciidanka booliska - Polismyndigheten Västmanlands Iän Tal. 114 14
wvyw.polisen.se

Daryeel-caafimaadeedka degdegga:
Cetrallasarettet Tal. 021-17 30 00
Bergslagssjukhuset Tal. 0223-470 00

Adeegga arrimaha bulshada - Socialtjänsten Tal.0220-390 40

Heeganka dhibbaneyaasha dambifalka - Brottsofferjouren i Hallstahammar — Surahammar
Tal. 0220-173 37
www.boj.se

Arosdöttrarna tjej- och kvinnobeskydd Tal. 021-410 75 38 Tal. 070-473 33 75

Kvinnofridslinjen Tal. 020-50 50 50
www.kvinnofridslinjen.se

Kvinnofridsportalen
www.kvinnofridsportalen.se

Xarunta dhibaatada ee ragga loogu talagalay - Kriscentrum for män Tal. 021-41 03 08

Waxyaalaha la adeegsan karo
Dowladda waxay ciidanka booliska, xeerilaaliyeyaasha, hey'adda dhibaneyaasha dambifalka *brottsoffermyndigheten*, hey'adda ammuuraha dambiileyaasha, adeegga arrimaha bulshada *socialtjänsten*, maamulka dugsiyada, daryeel-caafimaadeedka iyo Goleha gobolka siisay mas'uuliyad gaar ah oo ay ugula dagaalamaan xoog-muquuniska ragga ay dumarka u geystaan. Kuwa kale ee door wayn arrintaan ka qaadan karaan waxaa kamid ah, kiniisada, heeganka dumarka iyo ururrada iyo dan-wadaageyaasha bulshada u adeega.

Heeganka dumarka *Kvinnojouren*
Heeganka dumarka ee degmooyinka Hallstahammar/Surahammar, wuxuu dumarka fal xoog-muquunis ku salaysan loo geystay siiyaa taageero, isagoo taleefan ama booqasho adeegsanayo. Heeganka dumarka wuxuu dhibaneha ka caawi kara sidii uu xiriir u la yeelan laha hey'adaha kale, qareen, daryeel-caafimaadeedka iwm. Heeganka dumarka wuxuu kaloo dumarka iyo ubadkeeda, waa haddii ay sidato ka caawi kara helida hoy kumeelgaar ah.

Ciidanka booliska
Falalka xoog-muquuniska ee qoysaska ka dhaca waa dambifal. Qofka falka loo geystay ama la cagajugleeyay wuxuu falka wargelin kara ciidanka booliska *Polisanmälan*. Wargelinta waxaa kaloo ku dhaqaaqi karo qof arrinta la socdo. Ciidanka booliska waxaa waajib ku ah in uu wargelinta soo-dhoweeyo, kuna dhaqaaqo horudhaca baaritaanka. Dumarku wuxuu ciidanka booliska ka heli kara warbixin ku sabsan taageerada kala duwan u heli karo iyo badbaadada.

Daryeelka bukaanka iyo caafimaadka
Mas'uuliyada daryeel-caafimaadeedka waxaa hogaan u ah Xeerka daryeelka bukaanka iyo caafimaadka, oo guud ahaan u kormeera sida Xeerka Adeegga Bulshada. Daryeel-caafimaadeedka waxaa kalo xilsaaran ka hortegida caafimaad-xummada, iyo waajibka ka hortegida cudurrada iyo dhaawacyada. Sidaas awgeed, waa muhim tixgelinta arriamaha la xiriira caafimaadka maanka iyo yeelanshada kormeerid guud wejihan hawlgalka daryeel-caafimaadeedka. Mas'uuliyad wayn ee daryeel-caafimaadeedka waxaa kamid ah, soo bandhigida iyo qorida saldhigga caddaynta loo yaqaanno *rättsintyg*.

Carruur-xannaanaynta/dugsiga
Carruurta iyo dhallinyarada dhibaataysan waxay sharci ahaan xaq ku leeyihiin helida badbaadada iyo taageerada bulshada. Carruur-xannaanaynta iyo dugsiga waxaa saaran mas'uuliyad, in fiirogaar aah ay siyaan carruurta ku nool xaalad dhib badan.. Dugsiga iyo carruur-xannaanaynta waxay tixgeliyaan waajibka wargelinta *anmälningsskyldigheten* sida hdba ku xusan cutubka 14 Kap 1 § Xeerka Adeegga Bulshada. Taasi macneheedu waxay tahay in carruur-xannaanaynta iyo dugsiga, waajib ku tahay in daahid la'aan ay Guddiga arrimaha bulshada wargeliyaan, haddii ay la kulmaan ama ogaadaan jiritaanka cunug dhibaato ku sugan, taasoo u baahan in Guddiga arrimaha bulshada uu cunugu u gurmado, sida haddii cunugu u markhaati ka noqdo fal xoog-muquunis ku salaysan ee qoyskiisa ka dhacay.

Taageerada qoysaska iyo shaqsiyaadka
Adeegga arrimaha bulshada waxaa saaran xilka ugu wayn ay dadyoowga degmada ku nool, ku heli lahaayeen taageerada iyo caawinaada u baahan yihiin. Adeegga arrimaha bulshada wuxuu

dadyoowga falal xoog-muquunis eheladooda u geysteen, siin karaa wax ka qabad gaar ahaan loogu talagalay.

Talo-siinta qoysaska *Familjerådgivningen*
Waxaa jiro heshiis dhexmaray degmada Surahammar iyo talo-siinta qoysaska. Heshiisku wuxuu farayaa in dadyoowga degmada ku nool ay talo-siinta qoysaska lacag la'aan la xiriiri karaan. Talo-siinta qoysaska waxaa laga heli kara fursad xal loogu helo dhibaato qoyseed, iyadoo wada-hadal la adeegsanaayo.

Xarunta dhibaatada ee ragga loogu talagalay ee gobolka Västmanland
Kriscentrum for män
Waa urur u hawlgala sidii loo heli lahaa taageero iyo hogaamin lagu sii wanaajiyo wada xiriirka iyo wada-shaqaynta. Habka hawlgalka dhaqdhaqaaqida wuxuu ka kooban yahay xiriir taleefan ku salaysan, wada-hadallo gareed iyo dhaqdhaqaaqyo kooxeed. Dhaqdhaqaaqida waxay kalo khibrad u leeyahay falalka xoog-muquuiniska karaamada darteeda loo falo.

Kiniisada
Kiniisada door wayn ayee ka ciyaarta wada-shaqaynta ku salaysan la dagaalanka falalka ragga ee xoog-muquuniska ku salaysan ee dumarka loo geysto. Kiniisiada waxay dumarka dhibaataysan siin karta taageero-shaqsiyeed.

Brå/Boj
Heeganka dhibbaneyaasha dambifalka *Brottsofferjouren* Hallstahammar-Surahammar, waa urur-bulshodeed ee u hawlgala sidii warbixin iyo taageero loo siin lahaa dhibbaneyaasha dambifalka, qaraabadooda iyo markhaatiyaasha. Heeganka dhibbaneyaasha dambifalka laba siyaabood oo kala duwan ayuu uu hawlgala, mid waa hawlwadenyada taageerada taleefanka ku adeega habeen iyo maalin ba. Tan kale na waa taageerada markhaatiyaasha xilliga maxkamada. Hawlwadeneyada waxay tixgeliyaan xajinta sirta xirfada.